<p><b>20. Penalty Imposed on Juridical Person</b></p> <p>Notwithstanding Article 90 (1), (3) and (4) of the Criminal Code of the Federal Democratic Republic of Ethiopia, where any offence stipulated under this Part is committed by juridical person,</p> <p>1/ the penalty shall be fine from Birr 50,000 to 500,000 for a crime punishable with fine;</p> <p>2/ when the penalty provided for is imprisonment, the penalty shall be:</p> <p>a) a fine not exceeding 50,000 Birr for a crime punishable with simple imprisonment not exceeding three years,</p> <p>b) a fine not exceeding 100,000 Birr for a crime punishable with simple imprisonment not exceeding five years,</p> <p>c) a fine not exceeding 150,000 Birr for a crime punishable with rigorous imprisonment not exceeding five years,</p> <p>d) a fine not exceeding 200,000 Birr for a crime punishable with rigorous imprisonment not exceeding ten years,</p> <p>e) a fine of up to the general maximum laid down in sub-article (1) of this Article for a crime punishable with rigorous imprisonment exceeding ten years.</p>	<p><b>20. Ciqaabta Lasaaro Shaqsiga Sharcigu Abuuro</b></p> <p>Iyadoo uu sidiisa iska ahaanayo Qodobka 90 (1), (3) and (4) ee Xeerka Ciqaabta Jamhuuriyada Dimoqraadiga Federaalka Itoobiya, markii dambi lagu xusay Qaybtani uu galo shaqsi ah midka sharcigu abuuro,</p> <p>1/ ciqaabtu waa in ay noqotaa ganaax ka bilaabma 50,000 ilaa 500,000 marka dambigu yahay mid ganaaxa lagu ciqaabi karo;</p> <p>2/ marka ciqaabta u degani tahay xabsi, ciqaabtu waa in ay noqotaa:</p> <p>b) ganaax aan ka badnayn 50,000 Birr marka ciqaabta dambigu tahay xabsi fudud oo aan ka badnayn sadex sanadood,</p> <p>t) aganaax aan ka badnayn 100,000 Birr marka dambigu yahay mid ciqaabtiisu tahay xabsi fudud oo aan ka badnayn shan sanadood,</p> <p>j) ganaax aan ka badany 150,000 Birr marka ciqaabta dambigu tahay xabsi adag oo aan ka badnayn shan sandood,</p> <p>x) ganaax aan ka badnayn 200,000 Birr marka ciqaabta dambigutahay xabsi adag oo aan ka badnayn toban sanadood,</p> <p>kh) ganaax gaadhaya halka ugu saraysa ee lagu xusay firqada (1) ee Qodobkan marka ciqaabta dambigu tahay xabsi adaga oo aan ka badnayn toban sanadood.</p>

<p>3/ Where fine is expressly provided as punishment for a crime, it shall be five fold</p>	<p>3/ Marka ganaax si cad loo xuso ciqaab ahaan, waa in ay noqotaa shan lab.</p>
<p style="text-align: center;"><b>PART THREE PREVENTIVE AND INVESTIGATIVE MEASURES</b></p>	<p style="text-align: center;"><b>CUTUBKA SADEXAAD TALAABOYINKA KA HORTAGA IYO BAADHISTA</b></p>
<p><b>21. Principle</b></p> <p>The prevention, investigation and evidence procedures provided in this Part and Part Four of this Proclamation shall be implemented and applied in a manner that ensure protection for human and democratic rights guaranteed under the Constitution of the Federal Democratic Republic of Ethiopia and all international agreements ratified by the country.</p>	<p><b>21. Mabda’ Ahaan</b></p> <p>Ka hortaga, baadhista iyo habka Cadaynta ee ku xusan Cutubkan iyo Cutubka afraad ee Bayaankan waxaa loo hirgalinayaa loona adeegsanayaa qaab waafaqsan oo xaqiijinya Dhawrista xuquuqda Aadamaha iyo Dimoqraadiyada ee uu sugay Dastuurka Jamhuuriyada Dimoqraadiyada Itoobiya iyo Heshiisyada Caalamiga ee Dalku ansaxiyay.</p>
<p><b>22. General</b></p> <p>1/Computer crime prevention and investigation shall be conducted in accordance with the provisions of this Part.</p> <p>2/Without prejudice the provisions of this Part, for issues not clearly covered in this law, the provisions of the Criminal Code and other relevant laws shall be applicable to computer crimes.</p>	<p><b>22. Guud Ahaan</b></p> <p>1/Ka hortaga iyo baadhista dambiyada kombiyuutarka waa in loo sameeyaa si waafqsan qodobada Qabtan.</p> <p>2/Iyadoo aan waxba loo dhimayn qodobada Qaybtan, arimaga aan sida cad loogu xusin sharcigan, qodobada Xeerka Ciqaabta iyo shuruucda kale munaasibka ku ah dunuubka kombiyuutarada ayaa loo adeegsanayaa.</p>
<p><b>23. Investigative Power</b></p> <p>1/ The public prosecutor and police shall have joint power to investigate criminal acts provided for in this Proclamation. And the public prosecutor shall lead the investigation process.</p> <p>2/ Where requested to support the investigation process, the Agency shall provide technical support, conduct analysis on collected information, and provide evidences if necessary.</p>	<p><b>23. Awooda Baadhista</b></p> <p>1/ Xeer-ilaaliyaha dawlada iyo Booliisku waa in ay si wada jir ah u baadhaan ficilada dambiga ah ee ku xusan Bayaankan. Waana in Xeer-ilaaliyuhu haggaa geedi-socodka baadhitaanka.</p> <p>2/ Markii la dalbado taageero la xidhiidha dhinaca baadhista, wakaaladu waa in ay bixisaa taageero dhinaca farsamada ah, faaqidaad ku samaysaa xogta la soo ururshay islamarkaana cadayn dhiibtaa hadii loo baahan yahay.</p>
<p><b>24. Retention of Computer Data</b></p> <p>1/ Without prejudice to any provision stipulated in other laws, any service provider shall retain the computer traffic data disseminated through its computer systems or traffic data relating to data processing or communication service for one year.</p> <p>2/ The data shall be kept in secret unless the court orders for disclosure.</p>	<p><b>24. Ku Dhegenaanta Xogta Kombiyuutarka</b></p> <p>1/ Iyadoon wax loo dhimayn dhamaan qodobada lagu xusay shuruuxda kale, adeeg bixiye kastaa waa in uu ku dhegenaataa xogta kombiyuutarka ka baxda ee ku faafta nidaamyada kombiyuutarada amaa xogta la isku gudbiyo ee la xidhiidha habka amaa isgaadhsiinta adeega mudo hal sano ah.</p> <p>2/ Xogta waa in sir ahaan loo kaydiyaa hadii aany amrin soo bandhigeeda Maxakamadi.</p>

## 25. Real-time Collection of Computer Data

Without prejudice special provisions stipulated under other laws,

1/ to prevent computer crimes and collect evidence related information, the investigatory organ may, request court warrant to intercept in real-time or conduct surveillance, on computer data, data processing service, or internet and other related communications of suspects, and the court shall decide and determine a relevant organ that could execute interception or surveillance as necessary.

2/ Sub-article (1) of this Article shall only be applicable when there is no other means readily available for collecting such data and this is approved and decided by the Attorney General.

3/ Notwithstanding the provisions of subarticle (1) and (2) of this Article, the Attorney General may give permission to the investigatory organ to conduct interception or surveillance without court warrant where there are reasonable grounds and urgent cases to believe that a computer crime that can damage critical infrastructure is or to be committed.

4/ The Attorney General shall present the reasons for interception or surveillance without court warrant under sub-article (3) of this Article to the President of the Federal High Court within 48 hours, and the president shall give appropriate order immediately.

5/ Any irrelevant information collected pursuant to sub-articles (1) to (4) of this Article shall be destroyed immediately upon the decision of the Attorney General.

## 25. Wakhtiga Dhabtaa ee Ururinta XXogta Kombiyuutara

Iyadoon wax loo dhimayn qodobada khaaska ah ee lagu xusay shuruuca kale,

1/ si looga hortago dunuubta kombiyuutarka loona ururiyo cadaymo la xidhiidha xogta, haayada baadhista waxaa u furan, in ay ka codsato maxakamada fasax si ay dhexda uga qabsan karto marka wax dhacayaan amaa ay dabagal ku samayso, xogta kombiyuutarka, xogta habka adeega, amaa internetka iyo waxyaabaha kale la xidhiidha isgaadhsiinta laga shakiyo, maxakamaduna waa in ay go'aamisaa oo ay cayintaa haayada xogta dhexda ka qaban karta amaa dabagalka ku samayn karta kolba sida loogu baahdo.

2/ Firqada (1) ee Qodobkani waa in kaliya uu munaasib noqdaa markii aan la heli karin si kaloo xogta lagu ururin karo waana in uu arintan go'aamiyaa isla markaana ansaxiyaa Xeer-Ilaaliyaha Guud.

3/ Iyadoo ay sidooda ahaanayaan firqadaha (1) iyo (2) ee Qodobkan, waxaa Xeer-Ilaahayaha Guud u furan in uu fasax u siiyo cida dambibaadhista samanaysa in ay dhexda ka qabsan karaan xogta amaa ay dabagal ku Samayn karaan iyadoon fasax maxamakameed aan la haysan markii ay jiraan arimo macquul iyo xaalad degdeg ah oo lagu rumaysan karo in dunuubta kombiyuutarku burburin karto kaabayaasha dhaqaalaha ee Muhiimka ah amaa lagu talo jiro gaysashada dambiga.

4/ Xeer-Ilaalyaha Guud waa in uu u soo bandhigaa sababaha dhexda looga qabsanayo xogta amaa dabagalka iyadoon fasax maxakamadeed la haysan sida ku xusan firqada (3) ee Qodobkan Gudoomiyaha Maxakamada Sare 48 saacadood gudahood, Gudoomiyuhuna waa in uu amarka ku haboon ka bixiyaa.

5/ Wixii xog aan munaasib ahayn ee la ururiyo sida ay dhigayaan firqadaha (1) ilaa (4) ee Qodobkan waa in la burburiyaa isla marka Xeer-Ilaaliyaha Guud go'aanka gaadho.

<p>6/ Any service provider shall cooperate when requested to carry on activities specified under sub-articles (1) and (3) of this Article</p>	<p>6/ Adeeg bixiye kasta waa in uu gacan siiyaa markii laga dalbado arimaha lagu xusay firqada (1) iyo (3) ee Qodobkan.</p>
<p>7/ Without prejudice sub-article (5) of this Article, any information collected in accordance with this Article shall be kept confidential</p>	<p>7/ Iyadoon wax loo dhimayn firqada (5) ee Qodobkan, wixii xog ah ee lagu ururiyo sia uu dhigayo Qodobkani, waa in sir ahaan loo xafidaa.</p>
<p><b>26. Protection of Computer, Computer System or Infrastructure from Danger</b></p>	<p><b>26. Ka ilaalinta Khataraha Kombiyuutarad, Nidaamka Kombiyuutarada iyo Kaabayaasha</b></p>
<p>1/ Where there are reasonable grounds to believe that a computer crime is to be committed and it is necessary to prevent and control the crime, provide early warning to citizens, to minimize the risks or for effectiveness of the investigation, the Agency, in collaboration with the investigatory organ, and upon court warrant, may conduct sudden searches, conduct digital forensic investigation, provide appropriate security equipment or take other similar measures on computers, computer systems or infrastructures that are suspected to be attacked or deemed to be the sources of attack.</p>	<p>1/ Markii ay jiraan arimo la rumaysan karo oo ah in lagu talaabsanyo dunuub la xidhiidha kobmiyuutar islamarkaana loo baahan yahay in laga hortago lana xakameeyo dambiga, lana siiyo digniin muwaadiniinta, si hoos loogu dhigo khataraha amaa wax ku oolnimada baadhista, Wakaaldu waa in, iyadoo kaashanaysa cida baadhista wada, fasaxa maxakamadana la hayo, ay samayso baadhis kadis ah, baadhis casriya iyadoo la adeegsanyo qalabka casira ee wax lagu baadho, bixisaa qalabka nabadgalyada amaa ay ka qaadaa talaabooyin kombiyuutarada, nidaamka kombiyuutarada maa kaabayaasha laga cabsi qabo in lala beegsado weerarka amaa ahba ubucda wax laga weerarayo.</p>
<p>2/ For the implementation of the provision of sub-article (1) of this Article, as may be necessary and upon request, concerned organs shall have duty to cooperate</p>	<p>2/ Hirgalinta firqada (1) ee Qodobkan, kolba sida baahidu tahay ahna markii la dalbado, hayadaha ay khusayso waxaa waajib ka saaran yahay in ay gacansiiyaan.</p>
<p><b>27. Duty to Report</b></p>	<p><b>27. Xilka Warbixinta</b></p>
<p>1/ Any service provider or government organ who has knowledge of the commission of the crimes stipulated in this Proclamation or dissemination of any illegal content data by third parties through the computer system it administers shall immediately notify the Agency, accordingly report to the police about the crime and take appropriate measures.</p>	<p>1/ Qofkasta oo adeeg bixiye ah amaa hayada dawlada ee wax ka og dhicitaanka dunuubta lagu xusay Bayaankan amaa faafinta xog kastoo ay ay faafinteedu dambi tahay in ay samayso gees sadexaad iyadoo adeegsanaysa nidaamka kombiyuutarka ay maamusho waa in islamarkaa ay ogaysiisaa Wakaalada, isla markaana wargalisaa Booliiska dambiga talaabooyinka ku haboona ka qaadaa.</p>
<p>2/ The Agency may issue a directive as to the form and procedures of reporting</p>	<p>2/ Waxaa Suurto galka in ay Wakaaldu soosaarto awaamiir la xidhiidha hab raaca Warbixinta</p>
<p><b>28. Arrest and Detention</b></p>	<p><b>28. Xadhiga iyo Xabsi Ku Haynta</b></p>
<p>Without prejudice the provisions stipulated in special laws,</p>	<p>Iyadoon wax loo dhimayn qodobada ku jira shuruucda khaaska ah,</p>
<p>1/ where there are reasonable grounds to believe that a computer crime is committed or under commission, police may arrest suspects in</p>	<p>1/ marka ay jiraan arimo lagu rumaysto in dambi kombiyuutar la galay amaa fulintii dambigu socoto, waxaa u furan Booliiska in uu xidho</p>

<p>accordance with the provisions of the Criminal Procedure Code.</p> <p>2/ Where the investigation on the person arrested pursuant to sub-article (1) of this Article is not completed, remand may be granted in accordance with the provisions of the Criminal Procedure Code; provided, however, the overall remand period may not exceed four months.</p>	<p>eedaysanayaasha iyadoo loo marayo qodobada Habka Xeerka Cigaabta.</p> <p>2/ Marka baadhista qofka la xidhay si waafaqsan firqada (1) ee Bayaankan aan la dhamaystirin, xabsi ku hayn ayaa lagu heli karaa si waafaqsan Habka Xeerka Cigaabta; balse, sakastaba ha ahaatee, guud ahaan mudada xabsi ku hayntu waa in aanay ka badan afar bilood.</p>
<p style="text-align: center;"><b>PART FOUR EVIDENTIARY AND PROCEDURAL PROVISIONS</b></p>	<p style="text-align: center;"><b>CUTUBKA AFRAAD QODOBADA HABRAACA IYO CADAYMAHA</b></p>
<p><b>29. General</b></p> <p>1/Computer crime proceedings and collection of evidence shall be conducted in accordance with the provisions of this Part.</p> <p>2/Without prejudice to the provisions of this Part, the General Part provisions of the Criminal Code and the Criminal Procedure Code shall be applicable to computer Crimes.</p>	<p><b>29. Guud Ahaan</b></p> <p>1/Habraaca Dawcwada iyo ururinta Cadaymaha duubta kobiyuutaradu waa in ay u qabsoomaan si waafaqsan Cutubkan.</p> <p>2/ Iyadoo aan wax loo dhimayn qodobada Cutubkan, Cutubka qodobada Guud ee Habka Xeerka Cigaabtu ayaa munaasib ku noqonaya dunuubta Kombiyuutarada.</p>
<p><b>30. Order for Preservation of Computer Data</b></p> <p>1/ Where there are reasonable grounds to believe that a computer data required for computer crime investigation is vulnerable to loss or modification, the investigatory organ may order, in writing, a person to preserve the specified data under his control or possession</p> <p>2/ The person ordered under sub-article (1) of this Article shall immediately take necessary measures to secure the specified computer data and preserve it for three months and keep such order confidential.</p> <p>3/ The investigatory organ may order only a one-time extension for another three months up on the expiry of the period stipulated under sub-article (2) of this Article.</p>	<p><b>30. Amarka Xafidaada Xogta Kombiyuutarka</b></p> <p>1/Markii ay jiraan arimo lagu rumaysto in ay xogta kombiyuutarka ee loo baahday in baadhista lagu sameeyaa u nugushahay inay lunto amaa waxkabadal lagu sameyo, hayadaha baadhista waxay amri karaan, qoraal ahaan, qof xafida xog khaas ah oo maamulal islamarkaana haya.</p> <p>2/ Qofka lagu amro sida ay dhigayso firqada (1) ee Qodobkani, waa inuu islamarkaaba qaadaa talaabooyinka lagu sugayo xogta sida khaaska loo tilmaamay ee kombiyuutarka islamarkaana xafidaa sadex bilood amrkaasan sir ahaan u qariyaa.</p> <p>3/ Haayada baadhista waxay amri kartaa kaliya hal mar in loo kordhiyo sadex bilood oo kale oo ka bilaabanaysa maalinta ay dhamaato mudad lagu xusay firqada (2) ee Qodobkan.</p>
<p><b>31. Order for Obtaining of Computer Data</b></p> <p>1/ Where a computer data under any person’s possession or control is reasonably required for purposes of a computer crime investigation, the investigatory organ may apply to the court to obtain or gain access to that computer data.</p>	<p><b>31. Amarka Helitaanka Xogta kombiyuutarka</b></p> <p>1/ Marka xog kombiyuutar oo ku jirta maamulka iyo haynta qofka loo dhiibay loogu baahdo baadhista dambiga kombiyuutarka, haayada baadhista waxay maxakamada ka codsan kartaa in</p>

<p>2/ If the court is satisfied, it may, without requiring the appearance of the person concerned, order the person who is in possession or control of the specified computer data, to produce it to the investigatory organ or give access to same.</p>	<p>ay helaan amaa ay galgal u yeeshaan xogta kombiyuutarkaas.</p> <p>2/ Hadii ay maxakamadu ku qanacdo, waxay awoodaa, iyadoon qofku hor imaan maxakamada, in ay amarto qofka haya amaa maamulaya xogta kombiyuutarka, inuu siiyo haayada baadhista amaa u ogolaado galgalkeeda.</p>
<p><b>32. Access, Search and Seizure</b></p> <p>1/ Where it is necessary for computer crime investigation, the investigatory organ may, upon getting court warrant, search or access physically or virtually any computer system, network or computer data.</p> <p>2/ Where the investigatory organ reasonably believes that the computer data sought is stored in another computer system and can be obtained by same computer system, the search or access may be extended to that other computer system without requesting separate search warrant.</p> <p>3/ In the execution of search under subarticle (1) or (2) of this Article, the investigatory organ may:</p> <p>a) seize any computer system or computer data;</p> <p>b) make and retain a copy or photograph data obtained through search;</p> <p>c) maintain the integrity of the relevant stored data by using any technology;</p> <p>d) render inaccessible the stored data from the computer system on which search is conducted; or</p> <p>e) recover deleted data.</p> <p>4/ In the execution of search, the investigatory organ may order any person who has knowledge in the course of his duty about the functioning of the computer system or network or measures applied to protect the data therein to provide the necessary</p>	<p><b>32. Galgalka, Baadhista iyo Qaadista</b></p> <p>1/ Markii loogu baahdo baadhista dambiga kombiyuutarka, haayada baadhistu waxay awoodaan, marka ay helaan fasaxa maxakamada, in ay baadhaan amaa ay galgal u yeeshaan qalabka laftiisa amaa kombiyuutarka habshaqeekiisa waxkastoo la xidhiidha nidaamka kombiyuutarka, shabakadaha amaa xogt kombiyuutarka.</p> <p>2/ Marka hayada wax baadhaysaa ay rumaysan tahay in xogta kombiyuutarka ee la baadhayaa ku jirto nidaamka kombiyuutar kale laguna heli karo nidaam kombiyuutar oo lamid ah, baadhista amaa galgalka waxaa laga baadhi karaa iyadoon fasax maxakamadeed oo gaar ah loo dalban.</p> <p>3/ Marka la fulinayo baadhitaanka sida ku xusan firqadaha (1) amaa (2) ee Qodobkan, waxaa haayada baadhistu awood u leedahay:</p> <p>b) qabashada dhamaan nidaamyada kombiyuutar amaa xogta kombiyuutarka;</p> <p>t) ka qaadashada iyo latagista nuqul amaa sawir xogta la helo inta baadhista la wado;</p> <p>j) daryeelka qaayaha xogta lu kaydsan iyadoo la adeegsanyo farsama casriga ah;</p> <p>x) ka dhigista mid aan galgal loo yeelan karin xogta kaydsan nidaamka kombiyuutarka baadhista lagu Sameeyay; amaa</p> <p>kh) dib u soo celinta xog la masaxay.</p> <p>4/ arka Baadhista la samaynayo, haayada waxbaadhaysaa waxay amri kartaa shaqso kasta oo ay doonto oo xog ogaal ah ee ay ahayd xilkiisa shaqo in ay shaqayanayeen nidaamka kombiyuurka amaa shabakada amaa talaabooyinkii la qaday si loo xafido xogtii ku jirtay si looga helo xogta loo</p>

<p>information or computer data that can facilitate the search or access.</p> <p>5/ Where the investigatory organ finds the functioning of a computer system or computer data is in violation of the provisions this Proclamation or other relevant laws, it may request the court to order for such computer data or computer system to be rendered inaccessible or restricted or blocked. The court shall give the appropriate order within 48 hours after the request is presented.</p> <p>6/ Where the search process on juridical person requires the presence of the manager or his agent, the investigatory organ shall take appropriate measure to do so.</p>	<p>baahan yahaya amaa xogta kombiyuutarka ee sahli karta baadhista amaa galgalka.</p> <p>5/ Markii ay haayada wax baadhaysaa hesho in nidaam kombiyuutar oo shaqaynayay amaa xogta kombiyuutarka in ay gafsan tahay qodobada Bayaankan amaa shuruucda kale arintan khusaysa, amaa nidaamkaa kombiyuutarka iwayay ka dalban kartaa maxakamada in ay ay amarto xogtaas kombiyuutarka amaa nidaamkaas kombiyuutarka in laga dhigo mid aan loo yeelan karin galgal amaa xadido amaa xidho. Maxakamadu waa in ay amarka ku haboon ku bixisaa mudo 48 saac gudahood ah laga bilaabo marka codsigu soo gaadho.</p> <p>6/ Marka cid sharcigu shaqsi u aqoonsadu baadhista uga baahato in maarayaha amaa wakiilkiisa xaadir noqodo, hayada baadhistu waa in ay qaadaa talaabada arintaa ku haboon.</p>
<p><b>33. Admissibility of Evidences</b></p> <p>1/ Any document or a certified copy of the document or a certified printout of any electronic record relating to computer data seized in accordance with this Proclamation may be produced as evidence during court proceedings and shall be admissible.</p> <p>2/ Without prejudice to the admissibility of evidences to be produced in accordance with the Criminal Procedure Code and other relevant laws, any digital or electronic evidence:</p> <p>a) produced in accordance with this Proclamation; or</p> <p>b) obtained by appropriate foreign law enforcement bodies in accordance with Ethiopian Law shall be admissible in court of law in relation to computer crimes</p>	<p><b>33. Cadaymaha La Ogo;aan karo</b></p> <p>1/ Wixii qoraal ah amaa nuqulka la cadeeyo ee qoraalka amaa qoraalka dabaca ah ee la xaqiijiyo ee laga laga helo kaydka Xusuus Dhawrka ee la xidhiidhsan xogta kombiyuutarka ee lagu helo si waafaqsan Bayaankan waxaa loo adeegsan karaa cadayn inta dacwadu socoto waana la ogolaan karaa.</p> <p>2/ Iyadoo aan wax loo dhimayn Cadaynta la ogolaan karo ee lagu soo bandhigo sida uu dhigayo Habka Xeerka Ciqaabta iyo shuruucda kale la xidhiidha hawshan, cadayn kasta oo ah mid khadka ku qoran qalabka casrigaa iyo elektaroonikada:</p> <p>b) ee lagu soo bandhigo siwaafaqsan Bayaankan; amaa</p> <p>t) ay haayada sharci Fulinta ee Dadlaka dibada ee hawshan u qaabilsani ku helaan si waafaqsan sharciga Itoobiya waa laga ogolaan karaa maxakamada marka dunuubtu la xidhiidho kombiyuutarka.</p>
<p><b>34. Authentication</b></p> <p>Without prejudice to the authentication of written documents stipulated in other laws, any person who produces evidences provided under Article 33 of this Proclamation in a</p>	<p><b>34. Xaqiijinta</b></p> <p>Iyadoon wax loo dhimayn xaqiiqnimada wixii qoraal ku cad shuruucda kale, shaqsi kasta oo ugu soo bandhiga Dacwada maxakamada cadayn ku salaysan Qodobka 33 ee Bayaan ka waxaa xil ka</p>

<p>court proceeding has the burden to prove its authenticity.</p>	<p>saaran yahay in uu xaqiiqnimada Cadaynta muujiyo.</p>
<p><b>35. Original Electronic Document</b></p> <p>1/Any electronic record which is obtained upon proof of the authenticity of the electronic records system or by which the data was recorded or stored shall be presumed original electronic document.</p> <p>2/Without prejudice to sub-article (1) of this Article, the electronic printout which is obtained using a secured system under regular operation shall be considered original electronic evidence.</p> <p>3/Where the authenticity of an electronic record is not proved, any evidence that shows the following fact shall be admissible:</p> <p>a) the computer system was operating properly or the fact of its not operating properly did not affect the integrity of the electronic record; or</p> <p>b) it is established that the electronic record was recorded or stored by a party to the proceedings who is adverse in interest to the other litigant party seeking to introduce it; or</p> <p>c) it is established that the electronic record was recorded or stored in the usual and ordinary course of business by a person who is not a party to the proceedings and who did not record or store it under the control of the party seeking to introduce the record.</p>	<p><b>35. Qoraalka Elektarooniga ee Assalkaa</b></p> <p>1/ qoraalka kaydka elektarooniga ee loo qiro in uu xaqiiq yahay marka la raaco ndaamyada kyadka elektaroonikada amaa amaa ay xogtu ku duubnayd amaa ku kaydsanayd waa in lagu qadaraa in ay tahay qoraalkii assalka ahaa ee elektaroonikada.</p> <p>2/Iyadoon wax loo dhimayn firqada (10 ee Qodobka, wixii laga daabaco elektaroonikada ee la heloo iyadoo la adeegsanyo nidaam amaan ah inta hawsha lagu jiro waxaa loo qaadanayaa cadayn assal ah oo elektaroonik ah.</p> <p>3/Marka la xaqiijin kari waayo kaydka elektaroonikada, cadayn kasta oo muujisa xaqiiqda soo socotoa waa in la ogolaado:</p> <p>b) kombiyuutarka oo si fiican u shaqaynayay amaa cilada kombiyuutarku qabay ma wax yeelin qiimaha kaydka elektaroonikada; amaa</p> <p>) marka la garawsado in kaydka lelektaroonikada uu duubay amaa kaydshay qof dhinac ka ah dacwada kaas oo dantiisu ku jirto ka kuulaysiga dhinaca ay I dacwaynayaan; amaa</p> <p>j) la garawsado in kaydka elektaroonikada uu duubay amaa kaydshay qof shaqadiisa caadiga ah iska watay islamarkaana aan ka mid ahayn dhinacyada dacwadu ka dhaxayso.</p>
<p><b>36. Presumption of Courts</b></p> <p>When assessing the admissibility of evidence in accordance with this Proclamation, the court may have regard to the procedure, standard or manner in which a similar computer system is functioning.</p>	<p><b>36. Qadarka Maxakamadaha</b></p> <p>Marka la qaadaadhigayo Cadaynta in ogolaankaro Cadaynta si waafaqsan Bayaankan, Maxakamadu waxay ku salayn kartaa habraaca, halbeega amaa qaabka u shaqeeyo nidaam kombiyuutara isku mid ka ah.</p>
<p><b>37. Burden of proof</b></p> <p>1/ Public prosecutor has the burden of proofing material facts regarding the cases brought to the court in accordance with the standards stipulated in law.</p> <p>2/ Notwithstanding the provisions of subarticle (1) of this Article, upon proof of basic facts of the case</p>	<p><b>37. Xilka Cadaynta</b></p> <p>1/ Kiiska ka socda maxakamada waxaa xilka Cadaynta wuxu saaran yahay Xeer-ilaaliyaha Dawlada iyadoo la raacaya halbeegyada sharcigu dhigayo.</p> <p>2/ Iyadoo ay sideeda ahaanayso firqada (1) ee Qodobkani, markii uu si rasmi ah ugu cadeeyo</p>

<p>by the public prosecutor if the court believes necessary to shift the burden of proofing to the accused, the court may do so.</p>	<p>Xeer-ilaaliyughu maxakamada, hadii ay maxakamadu u aragto munaasib in xilka Cadaynta lagu wareejiyo dacwaysanaha way u fira tahay.</p>
<p style="text-align: center;"><b>PART FIVE INSTITUTIONS THAT FOLLOW UP CASES OF COMPUTER CRIME</b></p>	<p style="text-align: center;"><b>QAYNTA SHANAAD HAAYADAHA KORMEERKA KU SAMEEYA KIISASKA DUNUUBTA KOMBIYUUTARKA</b></p>
<p><b>38.Public Prosecutor and Police Following up Cases of Computer Crime</b></p> <p>1/A Public prosecutor or investigative officer empowered to follows up computer crime cases in accordance with the powers conferred by law shall have the responsibility to enforce and cause to enforce the provisions of this Proclamation.</p> <p>2/The Attorney General and Police empowered in this Proclamation may organize separate specialized task units when necessary to follow up computer crimes</p>	<p><b>38.Kormeerka Xeer-Ilaaliyaha Dawlada iyo Booliiska ee Kiisaska Dunuubta Kombyuutarka</b></p> <p>1/Xeer-Ilaaliyaha Dawlada amaa sargaalka dambi baadhaha ayaa awood u leh in ay kormeer ku sameeyaan kiisaska dunuubta kombiyuutarka iyadoo la raacayo awoodaha sharcigu siinayo xilbaana ka saaran Hirgalinta iyo suurto galinta hirgalka qodobada Bayaankan.</p> <p>2/ Xeer-Ilaaliyaha Guud iyo Booliiska awooda lagu siiyay Bayaankan waxaa u furan in ay agaasimaan qaybo si khaaas u ah uga shaqeeya markii loo baahdo si loo kormeero dunuubta kombiyuutarka.</p>
<p><b>39.Duty of the Agency</b></p> <p>The Agency shall have duty to establish online computer crimes investigation system and provide other necessary investigation technologies.</p>	<p><b>39. Xilka Wakaalada</b></p> <p>Wakaalada waxaa xilka saaran yahay in ay abuurto nidaam dambi baadhis oo ku shaqeeya Internetka iyo bixinta farsamooyinka casriga ah ee dambiga lagu baadho.</p>
<p><b>40. Jurisdiction</b></p> <p>1/ The Federal High Court shall have first instance jurisdiction over computer crime stipulated under this Proclamation.</p> <p>2/ The judicial jurisdictions stipulated under Article 13 and Article 17 (1) (b) of the Federal Democratic Republic of Ethiopia Criminal Code shall include computer crimes.</p>	<p><b>40. Awooda Garsoor</b></p> <p>1/Maxakamada Sare ee Federaalka ayaa yeelanaysa awooda garsoor ee bilawga ah ee la xidhiidha dunuubta kombiyuutarka ee lagu xusay Bayaankan.</p> <p>2/ Awooda garsoor ee lagu xusay Qodobka 13 iyo Qodobka 17 (1) (t) ee Xeerka Ciqabta Jamhuuriyada Dimoqraadiga ee Federal Itoobiya waa in ay ku jiraan dunuubta kombiyuutarku.</p>
<p><b>41. Establishment of Executing Task Force</b></p> <p>1/ Without prejudice the power of the Agency to lead national cyber security operation as stipulated in other relevant laws, a National Executing Task Force comprising the Federal Attorney General the Federal Police Commission, and other relevant bodies shall be established in order to prevent and control computer crimes.</p>	<p><b>41. Aas-aaska Koox Hawlwadaana</b></p> <p>1/ Iyadoon wax loo dhimayn awooda wakaalada ee ah in ay hogaamiso amaankaranka ee dhinaca Internetka sida ku xusan shuruucda kale, Koox Hawlawadeeno ah oo ka kooban Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Federaalka, Komishineerka Booliiska ee Federaalka, iyo cida kale ku haboon waa in la aas-aasaa si ay uga hortagaan una xakameeyaan dunuubta kombiyuutarka.</p>

<p>2/ The Federal Attorney General shall lead the Executing Task Force, identify other relevant organizations to be incorporated in the Task Force and ensure their representation.</p> <p>3/ The Task Force shall, for the prevention and control computer crimes, develop national discussion forum, discuss on occasional dangers materialized and provide recommendation thereof, design short and long term plans to be performed by the respective institutions as well as put in place synchronized system by coordinating various relevant organs</p>	<p>2/ Waa in Xeer-Ilaaliyaha Guud hogaamiyaa Kooxda Hawlwadeenka ah, islamarkaana tilmaamaa hayadaha ku haboon in lagu biiriyo Kooxdan Hawlwadeenka ah si loo xaqiijiyo tabiinada.</p> <p>3/ Kooxda hawlwadeenka ahi waa in, si looga hortago loona xakameeyo dunuubta kombiyuutarka, abuuraan madal qaran, ka doodaan waxyaabaha khatarta badan marka ay dhacaan islamarkaana bixiyaan talo soojeedin, dejiyaan qorshe wakhti dheer iyo mid wakhtigaaban oo ay tahay in ay hirgaliyaan hayadaha ay khusayso sidoo kalena ay sameeyaan nidaam xidhiidhsan iyagoo iskuduwaya hayadaha kala duwan ee ay hawshu khusayso.</p>
<p><b>PART SIX MISCELLANEOUS PROVISIONS</b></p>	<p><b>QAYBTA LIXAAD QODOBO GUUD</b></p>
<p><b>42. International Cooperation</b></p> <p>1/The Federal Attorney General shall cooperate or enter in to an agreement with the competent authority of another country in matters concerning computer crime, including the exchange of information, joint investigations, and extradition and other assistances in accordance with this Proclamation and agreements to which Ethiopia is a party and within the limits of the country’s legal system.</p> <p>2/For the effective implementation of this Proclamation, the investigatory organ may exchange information with institutions of another country having similar mission, perform joint cooperation in other forms or sign agreement with institutions of another country, when necessary.</p> <p>3/Any information or evidence obtained pursuant to this Article shall apply for the purpose of prevention or investigation of computer crimes.</p>	<p><b>42. Iskaashiga Caalamiga</b></p> <p>1/Xeer-Ilaaliyaha Guud waa in uu gacan ka gaystaa amaa heshiis kala gala hayad ay khusayso oo ka socota Dal kale arimaha la xidhiidha dunuubta kombiyuutarka, oo ay ku jiraan xog iswaydaarsiga, baadhitaanka wada jirka iyo mastaafurinta iyo kaalmooyinka kale iyadoo la raacayo sida uu xeerinayao Bayaankani iyo heshiisyada ay Itoobiya qaybta ka tahay iyo Xayndaabka nidaamka sharci ee Dalka.</p> <p>2/hamsami u Hirgalinta Bayaankan, waa in haayada baadhistu xogta la wadaagtaa hayadaha dalalka kale ee isku himilada la yahay, la samaysaa iskaashi noocyo kale ah amaa la saxeexataa hayadaha dadlalka markii loo baahdo.</p> <p>3/dhamaan xogta iyo Cadaymaha lagu helo si waafaqsan qodobkan waa in loo adeegsadaa ujeedada ah ka hortaga iyo baadhista dunuubta kombiyuutar.</p>
<p><b>43. Suspension, Confiscation or Blockage of Computer System or Asset</b></p> <p>1/ The court, in sentencing an offender under this Proclamation, may give additional order for the suspension, confiscation or removal of any computer system, data or device or blockage of data processing service used in the perpetration of the offence.</p>	<p><b>43. Hakinta, Lawareegista iyo Xidhitaanka Nidaamka Kombiyuutarka amaa Hantida</b></p> <p>1/ Maxakamadu, marka ay xukumayso dambilaha, wxaa u furan in ay u raaciso amar faraya hakinta, lawareegista amaa meesha ka rarida nidaamka kombiyuutarka, xogta amaa aalada amaa in ay xidho habka ka shaqaysiinta xogta loo adeegsaday Fulinta dambiga.</p>

<p>2/ The property or proceedings of the accused that he directly acquired through the computer crime for which he has been convicted shall be confiscated if the accused is convicted through a final decision;</p> <p>3/ Other relevant laws shall be applicable for the implementation of this article.</p>	<p>2/ hantida amaa wixii uu dacwaysanuhu si toos ah uga helay dunuubta kombiyuutar ee dambigeeda lagu helay waa in lala wareegaa hadii dambiiluhu helay xukunkii kama dambaysta ahaa;</p> <p>3/ shruucda kale ee arimahan la xidhiidhaa waa loo adeegsan karaa Hirgalinta qodobkan.</p>
<p><b>44. Power to Issue Regulation and Directive</b></p> <p>1/ The Council of Ministers may issue regulations necessary for the implementation of this Proclamation.</p> <p>2/ The Agency may issue directives necessary for the effective implementation of this Proclamation.</p>	<p><b>44. Awooda Soosaarista Xeer-Nidaamiyaha iyo Awaamiirta</b></p> <p>1/ Golaha Wasiirada waxaa u furan soo saarista xeer-nidaamiyeyaasha loo baahdo si loo hirgaliyo Bayaankan.</p> <p>2/ Wakaalada waxaa u furan in ay soo saarto awaamiir si si habsami leh loogu hirgaliyo Bayaankan.</p>
<p><b>45. Repeal and Inapplicable Laws</b></p> <p>1/ Articles 706 to 711 of the Criminal Code of the Federal Democratic Republic of Ethiopia and article 5 of Telecom Fraud Offence proclamation no. 761/2012 are hereby repealed.</p> <p>2/ No proclamation, regulations, directives or practices shall, in so far as they are inconsistent with this Proclamation, be applicable with respect to matters provided for by this Proclamation</p>	<p><b>45. Nasakhaada iyo Shuruucda Aan La Adeegsan Karin</b></p> <p>1/ Qodobada 706 ilaa 711 ee Xeerka Ciqaabta ee Jamhuuriyada Dimoqraadiga Federaalka Itoobiya iyo qodobka 5 ee Bayaanka Dunuubta waxisdabamarinta ee tirsiguusu yahay 761 waxaa nasakhay bayaankan.</p> <p>2/ Ma jiri karo bayaan, xeer-nidaamiye amaa awaamiir amaa dhaqan, inta ay khilaafsan yihiin Bayaankan, la adeegsan karo marka laga hadlayo ariamaha lagu xusay Bayaankan.</p>
<p><b>46. Effective Date</b></p> <p>This Proclamation shall enter into force on the date of its publication in the Federal Negarit Gazette</p>	<p><b>46. Taariikhda Dhaqan Galka</b></p> <p>Bayaankani wuxuu dhaqan galayaa maalinta lagu daabaco Wargayska Federaalka ee Negarit</p>
<p><b>Done at Addis Ababa, this 7th day of July, 2016</b></p>	<p><b>Addis Ababa, 7 dii July, Sanadkii 2016</b></p>
<p><b>MULATU TESHOME (Dr.) PRESIDENT OF THE FEDERAL DEMOCRATIC REPUBLIC OF ETHIOPIA</b></p>	<p><b>MULATU TESHOME (Dr.) MADAXWAYNAHA JAMHUURIYADA DIMOQRAADIGA FEDERAALKA EE ITOOBIYA</b></p>